SHARIXIDDA-MAKTABADDA **Somali**

MAKTABADDU WAA GOOBTA KULANKA EE CIDWALBA

Maktabaddu waa goobta kulanka iyo xarunta dhaqanka. Maktabadda waxbaad ku akhrisan kartaa, saaxiibadaa waad kula kulmi kartaa, iyo waliba waxaad ka qayb geli kartaa waxyaabaha lagu qabto. Shaqaalaha maktabaddu diyaar bay kuu yihiin inay ku caawiyaan, kaagana jawaabaan su`aalahaad waydiiso, iyo inay ku kalabaraan maktabadda. Xitaa af-ingiriiska ayaa laguugu adeegayaa.

Waa maxay maktabaddu?
Maktabadda waxaa loogu talagalay carruurta, dhalllinyarada, dumarka, iyo raggaba. Maktabadda waxaad ka amaahan kartaa buugaagta, jaraa`idyada, filimada, muusikada, cayaaraha kumbuyuutarka, iyo barashada luuqadaha. Maktabadda waxaa laga helaa wax yaalaha laga barto luuqadda finishka. Carrurrta waxay ka heli karaan buugaagta sawirka leh kuwa sheekooyinka, filimada carruurta, muusikada, waxaa kaloo laga helaa qoraalka garaacista muusika iyo qalabka ku duuban muusikada. Maktabado waxaa jira leh qol muusikada lagu garaaco sida biyaanada oo kale.

Maktabadda waxaad ku akhrisan kartaa jaraa`idyada iyo wargaysyada adduunka. Maktabadda waxaa yaala kumbuyuutar leh internet. Waxaadna ka akhrisan kartaa jaraa`id ku qoran luuqadaada.

Maktabadaha qaarkood haddaad rabto in aad ballan ka qabsatid kumbuyuutarka waxaad u baahan tahay kaarka maktabadda, ballantaas horay waad u qabsan kartaa ama markaas ayaad meesha ka qabsan kartaa, kumbuyuutarka leh internetka waxaad ka akhrisan kartaa fariimaha, waxaad kaloo ka raadin kartaa wixii warbixin ah ood u baahan tahay waxna waad ka daabacan kartaa, daabacaaddu waa lacag, kumbuyuutar kasta waxa uu lee yahay barnaamijka wax lagu qoro iyo wax yaalo kale oo wax tar leh, Maktabadaha qaarkood waxaa yaala iskaaner iyo teebka kumbuyuutarka oo ku qoran luuqado kala duwan. Tampere waxaad ka helaysaa caa wimaad ah sida loo isticmaalo barnaamijyada Teitotori iyo Netti-Nyssega.

Booqashada maktabadda, ka ammaahashada iyo isticmaalka kumbuyuutarka waa lacag la`aan.

Sideed ku heli kartaa kaarka maktabadda?
Qofwalba waa heli karaa kaarka maktabadda. Waxaad u baahanaysaa kaarkaas markaad rabto inaad wax ka amaahato maktabadda kaarkaas waxaad ku isticmaali kartaa Pirkanmaan oo dhan, waxaad helaysaa kaarkaas markaad tusto aqoonsi leh sawir. 15 sano iyo wixii ka yar waxaa foomka codsiga kaarka u saxiixaya waalidka.

Kaarka kuugu horreeyo waa lacagla`aan. Kaarku waa mid shaqsiyadeed, mana siin kartid qof kale. Haddii kaarku kaalumo, soo ogaysii islamarkiiba maktabadda. Kaarka waxaa la socda lambarka sirta ama PIN - kood.

PIKI
PIRKANMAAN KIRJASTOT

Ammaahashada iyo soocelinta
Xilliga ammaahashada way isbadashaa inta badan waa laba ama afar usbuuc. Markaad ammaahsato waxaad helaysaa rasiid. Rasiidka waxaa ku qoran muddada soo celinta ammaahda. Ammaahdaas waxaad ka cusbooniisan kartaa maktabadda PIKI- verkada ama taleefan, waa haddii waxa aad amaahatay uusan qofkale xajisan ama uusan dalbanin.

Qofwalba waxa uu xaq u lee yahay in uu wax ammaahdo waa haddii uu ku dhaqmayo sharciyada maktabadda. Haddaad ka soo daahdo muddada soo celinta, waxaad bixin doontaa qarashka la soo daahidda. Adiga ayaa mas`uul ka ah wixii aad ammaahato.

Sida wax loo xajisto
Wax aanan oolin maktabadda waad xajisan kartaa. Waxaad wax ka xajisan kartaa internedka ama maktabadda dhexdeeda qaybta u adeegidda macaamiisha. Marka wax laguu xajinayo waa lacag, carruurta iyo dhalinyarada marka wax loo xajinayo waa lacagla`aan.

Sideed u helaysaa waxa aad ammaahanaysid?
Buugaagta ama wax yaalaha kale ee maktabadda yaala waxaa loo qaybiyey maado maado, maado kasta waxa ay lee dahay qaanad u gooni ah. Tusaale ahaan joqoraafiga Finland waxaad ka helaysaa qaanadda 42. Buugta waxa ay qaanadda oogu jiraan sida ay xarfuhu isugu xigaan inta badan magaca dambe ee qoraha buugga. Buugaagta sheekooyinka waxa ay qaanadda oogu jiraan luuqad luuqad.

Buugga aad rabto waxa uu ku saab san yahay iyo qaanadda uu ku jiro waxaad ka helaysaa kumbuyuutarka maktabadda, iskaa ayaanad u raadsan kartaa. Waxaad ku raadin kartaa waxa uu ku saab san yahay, ama magaca buugga ama magaca qofka qoray. Kumbuyuutarka waxaad ka arkaysaa in buugaas la ammaahan karo iyo in kale, iyo in uu qofkale xajistay, iyo in uu yaalo maktabad kale. Shaqaalaha maktabadda ayaa kaa caawinaya kulana raadinaya wixii aad doonaysid.

Waxyaalaha lagu qabto maktabadda
Maktabadda waxaa lagu qabtaa wax yaalaha carruurta sida dhageesashada sheekooyinka, iyo cayaaro waxaana ka qayb qaadan kara carruurta ka wayn 3 sano. Dhagaysashada sheekooyinkaas iyo aqrintooda waxa ay inta badan ku baxaan luuqadda finishka. sidoo kale waxa ay carruurtu leeyihiin tiyaatar ay wax ku soo bandhigaan.

Maktabadda waxaa lagu qabtaa xaflado, isbarasho, soo bandhigid, lakulan ah qorayaasha, wax yaalaha ay qaban qaabiso maktabaddu ka soo qayb galkeedu waa lacagla`aan. Inta badan meelaha wax lagu soo bandhigo waa meelo uqaas ah oo loogu talagalay. Wax yaalaha lagu qabanayo maktabadda waxaad ka ogaanaysaa maktabadda dhexdeeda, hoyga netka ee maktabadda, jaraa`idka ama raadiyaha.

Gaariga maktabadda ah
Gaariga magtabadda ah waxa uu lee yahay boosteejooyin ama meelo uu istaago oo u gooni ah meelahaas oo ah meel aan u dhaway maktabad. Jadwalka gaarigaas maktabadda ah waxaad ka helaysaa hoyga netka ee maktabadda, ama maktabadda.

Kusoo dhawoow maktabadda.
Hoyga netka maktabadda ayaad ka helaysoo adereeska ama cinwaanka maktabadda iyo xilliga ay furantahay. Maktabad kasta waxa ay ka tirsantahay xiriirka maktabadaha wadanka gudihiisa iyo dibaddiisa. Maktabaddu waa meel dadkoo dhan ka dhaxaysa dhacdooyinna lagu qabto.

PIKI
PIRKANMAAN
KIRJASTOT